DUGSIGA DEGMADA PARK HILL
XEERKA ANSHAXA ARDEYGA
DUGSIGA DHEXE

Heerarka anshaxa ardeyga waxa dajiyay Guddiga Waxbarashada (Guddi) si loo abuuro jawi in la ilaaliyo xaqa waxbarsho ee arday kasta. Marka laga reebo sida si gaar ah loogu sheegay xeerka Guddiga, xeerarkaan waxa lagu dabaqayaa dhammaan dhismayaasha dugsiga, gudaha ama agagaarka garoonada dugsiga, dhammaan howlaha dugsiga iyo howlaha ku lug leh dugsiyada Park Hill, ama gaadiid kasta marka gaadiidka loo isticmaalo in lagu qaado ardeyda dugsiga degmada. Buug gacmeedka waalidka ardeyga iyo dhammaan xeerarka Guddiga waxa laga heli karaa online-ka mareegta Dugsiga Degmada Park Hill, www.parkhill.k12.mo.us. Xeerarka lagu faahfaahiyay buug gacmeedka waalidka ardeyga, iyo sidoo kale kuwa lagu sheegay xeerarka Guddiga ee khuseeya anshaxa habboon ee ardeyda, waxay khuseeyaan dhammaan ardeyda. Ardyda waxa si adag loogu dhiiri gelinayaa inay toos ugu warbixiyaan maamulaha wixii ah xadgudubyadaa xeerarka dugsiga iyo/ama Xeerka Guddiga.

Ardeydu waa in ay u hogaansamaan xeerarka kujira Xeerka Anshaxa. Ardeyda ku xadgudba xeerarkaan waxa laga qaadi doonaa tillaabo anshaxeed, taas oo ay kujiri karto joojin ama ceyrin, iyo/ama ugudbinta sharci fulinta. Kuwa soo socda kuma jiraan dhammaan anshaxa ardeyga ee la mamnuucay ama cawaaqibyada ka dhalan kara.

1. Dugsiga Degmada Park Hill wuxuu mamnuucayaa heysashada, isticmaalka, qeybinta, iibinta, iibsashada, gudbinta, wareejinta, ama helida hub. Hub waxa lagu qeexaa qalab kasta, qalab, aalada, ama madfac kaas oo si macquul ah loogu isticmaali karo weerar ama difaac looga hortago cadowga, ama dhibanaha; ama qalab kasta ama aalada taas oo si macquul ah loogu isticmaali karo in lagu handado, loogu hanjabo ama dhaawac jireed loogu geysto ama lagu waxyeeleeyo qof kale. Hub waxa ka mid noqon kara agabka caadiga ah ee dugsiga, alaabaha guriga, qalabka ama alaabaha kale oo loo isticmaalo weerar ama la isaga difaaco cadow, dhibanaha, ama marka loo isticmaalo handadaad, hanjabid ama gaarsiinta dhaawac jireed ama waxyeelleynta qof kale. Arday kasta oo ku xadgudba xeerkan wuxuu muteysan doonaa in laga joojiyo ama laga ceyriyo dugsiga. Marka laga reebo sida si gaar ah loogu sheegay Xeerka Guddiga, haddii la go'aamiyo in ardeygu uu keenay dugsiga mid ka mid ah hubkan soo socda, Ardayga waa laga joojin doonaa muddo aan ka yareyn hal sano ama waxa lagu talinayaa in la eryo: hub, jaakad madow, hub qarsoodi ah, hubka qarxa, aamusiyaha hubka, qoriga gaaska, mindida, lugaha, qoryaha darandooriga udhaca, qoriga mashiinka (qaanso, qaanso, qoriga pallet-ka, qoriga paintball, fargan, ama hubabka kale ee aan ahayn hub), qoriga, qoriga toogashada, iyo/ama mindida laabanta. Hub waxa sidoo kale ku jiri kara walxaha lagu ciyaaro, replica ama waxkasta oo u eg ama shay kale oo laga yaabo in loo arko hub ahaan.

2. Dugsiga Degmada Park Hill waxa uu mamnuucayaa heysashada, isticmaalka, qeybinta, iibinta, iibsashada, gudbinta, wareejinta, helitaanka, ama leh saameynta khamrida ama daroogada.

3. Dugsiga Degmada Park Hill wuxuu mamnuucayaa heysashada, isticmaalka, qeybinta, iibinta, iibsashda, gudbinta, wareejinta, ama helitaanka tubaakada ama qalab kasta oo sigaar cabid, oo ay ka mid tahay lakin aysan ku koobneyn nuugida.

4. Dugsiga degmada Park Hill waxa uu mamnuucayaa nooc kasta oo dhibaateyn ah oo lid ku ah xeerka AC. Dhaqamada loo arki karo dhibaateyn waxa kamid ah, lakin aysan ku koobneyn, magac-bixinta, isticmaalka hadalo deel qaaf ah, midab takoorka ama cayda kale, kaftanka aan habboneyn, sawiro ama sawiro elegtaroonig ah, ficilo gardaro ah, ama waxyeello loo geysto hantida.

5. Dugsiga Degmada Park Hill waxa uu mamnuucayaa nooc kasta oo dhibaato galmo ah oo xadgudub ku ah xeerka AC ama xeerka ACA. Dabeecadaha loo arki karo in ay yihiin dhibaateyn galmo waxa ku jiri kara, lakin aysan ku koobneyn, codsiyada galmo, magac yeerida, ceyda, kaftnka, eegmada, ama xiriirada nooca galmo ah ama ku saleysan galmo, iyo xiriirka jir ahaaneed ama taabashada qaab galmo ah.

6. Dugsiga Degmada Park Hill wuxuu ardada ka mamnuucaya weerarida ardeyda, dagaalka, cabsida, cagajugleynta, cagajugleynta internetka, hanjabaada dugsiga ama erayada hanjabaada ama ficil qof ama hanti, iyo/ama ficilada kale ee xadgudubka.

7. Haddii ardeygu muujiyo diidmo joogto ah oo uu ku diidayo in uu dabaqo sharcyada dugsiga, ardeyga waxa laga qaadi doonaa tallaabo anshax ah oo ay ka mid noqon karto in la joojiyo iyo/ama in la eryo.

8. Dugsiga degmada Park Hill waxa uu ardeyda ka filanayaa in labiskooda iyo quruxdoodu ay noqoto mid nadiif ah, oo dhadhan wanaagsan leh. Labiska iyo quruxdu ma carqaledeyn doonaan jawiga waxbarashada. Marka, xukunka maamulaha loo eego, muuqaalka ama labiska ardey uu carqaladeeyo hannaanka waxbarashada ama uu keeno hanjabaad caafimaad ama nabadgelyo, ardeyga waxa looga bahan karaa in uu wax badalo.

Tani waa qeyb ka mid ah liiska iyo sharraxaada ee sharciyada anshaxa ee xukuma anshaxa ardeyga. Ardeyda waxa laga filayaa in ay isbaraan dhammaan xeerarka. Fadlan la xiriir maamulaha dugsigaga haddii aad qabtid wax su'aalo ah marka aad dib u eegeysid xeerka anshaxa ama buug gacmeedka waalidka ardeyga.

HESHIISKA ISTICMAALKA TIKNOLOJIYADA ARDAYGA: Saxiixada dhanka hoose, Waxan sidoo kale aqbalay in aan u hogaansamo xeerka isticmaalka tiknolojiyada degmada iyo hannaanka. Waxan fahansanahay in ku xadgudubka qodobadan ay keeni karto in tillaabo anshaxeed la iga qaado oo ay ka mid tahay, lakin aan ku koobneyn, joojinta ama kala noqoshada helitaanka tiknolojiyada degmada iyo kajoojinta ama kaceyrinta dugsiga.

Waan fahansanahay in isticmaalkeyga agabyada tiknolojiyda dugsiga aysan ahayn mid shakhsiyeed oo ay suurto gal tahay in dugsiga degmadu ay la socoto xiriiradeyda elegtarooniga ah iyo dhammaan isticmaalka kale ee agabyada tiknolojiyada dugsiga. Waxaan oggolahay dhexgelida ama gelida dhammaan xiriiradeyda elegtarooniga ah iyada oo la isticmaalayo agabyada tiknolojiyda ee degmada iyo sidoo kale walxaha lasoo dejiyay iyo dhammaan xogta aan ku keydiyay agabyada tiknolojiyada ee degmada, oo ay ka mid yihiin faylasha la saaray, iyada oo la raacayo sharciga gobolka ama federal-ka, xitaa haddii agabyada tiknolojiyada degmada meel fog laga galo.

WAAN AKHRIYAY OO FAHMAY XEERKA ANSHAXA IYO MASUULIYADEYDA IN AAN RAACO DHAMMAAN XEERARKA ANSHAXA DUGSIGA DEGMADA PARK HILL SIDA LAGU SHEEGAY KOR, BUUG GACMEEDKA DUGSIGA, IYO XEERKA GUDDIGA. WAXAN SIDOO KALE URIYAAQAYAA IN AAN KA HELI KARO NUQUL ONLINE AH EE BUUG GACMEEDKA DUGSIGA EE 2022-2023, KAAS OO AY KUJIRTO XEERARKA ISTICMAALKA TIKNOLOJIYDA. WAAN FAHMAY IN AY TAHAY MAS'UULIYADEYDA IN AAN AKHRIYO, AQOONSADO ISLA MARKAANA RAACO SHARCIYADA DUGSIGA DEGMADA PARK HILL.

Magaca Daabacaada	**Magaca Saxiixa**	**Heerka Fasalka**	**Taariikhda**
Cadaan – Nuqulka Dugsiga	Jaalle – Nuqulka Ardeyga		